

Wax-ka-beddello waaweyn ayaa lagu sameeyay qiimaynta waddamada – waddamo kale ayaa noqonaya cagaar

Laga bilaabo 5-ta Julaay waxa xayiraadaha soo gelidda iyo xeerarka karantiilka ee Norway lagu salayn doonaa habka qiimaynta xaaladaha waddamada ee Midowga Yurub (EU). Dawladdu waxa ay samaysay wax-ka-beddello dhowr ah oo ku salaysan qiimaynta Machadka Caafimaadka Dadweynuhu (FHI) uu toddobaad kasta ku sameeyo xaaladda waddamada, waxaana hadda cagaar noqonaya waddamo kale. Islamarkaana markii ugu horreysay ayay FHI qiimayn ku sameeyay gasiiraddo gaar ah oo ku yaalla Yurub iyo waddamo saddexaad oo gaar ah. Dhammaan wax-ka-beddelladani waxa ay dhaqangal noqonayaan saqda dhexe, habeenka Isniinta 5-ta Julaay.

– Inkastoo qaybo badan oo Yurub ah hadda noqonayaan cagaar, oo markaana dad badan soo geli karaan waddanka iyaga oo aan gelaynin karantiilka safarka, haddana waxa weli jiraya xeerar ku saabsan diiwaangelinta soo gelidda waddanka iyo tijaabada lagu qaadayo xuduudda oo laga rabo dadka ka imanaya waddamada cagaarka ah. Xeerarkani waxa ay inaga ilaalinayaan cudurka inooga imanaya dibedda, waxa aynu kula socon karnaa xaaladda jirta islamarkaana waxa ay inaga ilaalinayaan noocyada cusub ee fayruska, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Wasaaradda Arrimaha Dibeddu waxa ay weli dadka kula talinaysaa in ay iska dhaafaan safarrada laga maarmi karo ee lagu aadayao waddamo ka baxsan EØS/Schengen iyo Ingiriiska. Laga bilaabo 5-ta Julaay waxa xeerkan laga dhaafayaa waddamo iyo aagag gaar ah oo ku jira liiska waddamada saddexaad ee EU, waa waddamada «midabka basaliga ah» ([eeg liiska hoos ku yaalla](#)).

Waddamaas ayaa haddaba laga reebayaa talooyinka safarrada. Talooyinka safarrada ee khuseeya adduunka intiisa kale waxa ay soconayaan ilaa iyo 10-ka Ogosto.

Maadaama la isticmaalayo habka qiimaynta waddamada ee EU islamarkaana la isticmaalayo khariirad midabyo leh, waxa hadda laga bilaabo la isticmaali doonaa ereyga «waddamada midabka liinta ah». Maanta waa isku mid xeerarka soo gelidda waddanka ee khuseeya waddamada liinta ah iyo kuwa casaanka ah, laakiin waa wax is-beddeli kara wakhtiga soo socda.

Waddamada ku yaalla Yurub (laga reebay waddamada Woqooyiga Yurub/Noordiga)

Waddamadan ayaa cagaar noqonaya:

Beljim, Bulgaariya, Estooniya, Faransiiska, Færøylene, Giriiga, Talyaaniga, Kuruweeshiya, Leyshenistayn, Litweyniya, Lugsanbeereg, Malta, Boolan, Romaaniya, San Marino, Islofaakiya, Islofeeniya, Iswiserland, Jeekiya, Jarmalka, Hangari, Fatikaanka iyo Usteeriya.

Waddamadan ayaa sii ahaan doona cagaar:

Grønland iyo Island.

Waddamadan ayaa sii ahaan doona liin ama casaan:

Ayrland, Qubrus, Latfiya, Monaco, Holland iyo Bortuqaal (midabka liinta). Andoorra, Isbaaniya iyo Ingiriiska (casaan).

Dadka socdaalka ah ee ka yimaada Ingiriiska waxa hadda laga dhafaayaa in ay qaybo ka mid ah karantiilka ku qataan hoteel karantiil (waxa laga beddelay casaan tiq ah waxaana loo beddelay casaan).

Gobollo ku yaala Woqooyiga Yurub (Norden)

Iswiidhan

Gobolladan ayaa noqonaya cagaar:

Dalarna, Gotland, Gävleborg, Halland, Jämtland, Skåne, Stockholm, Södermanland, Uppsala, Västerbotten, Västernorrland, Västmanland, Västra Götland, Örebro iyo Östergötland.

Gobolladan ayaa sii ahaan doona liin ama casaan:

Blekinge, Jönköping iyo Kalmar (midabka liinta) iyo Kronoberg, Norrbotten iyo Värmland (casaan).

Danmark

Gobolladan ayaa noqonaya cagaar:

Sjælland, Syddanmark, Midtjylland iyo Nordjylland.

Gobolka Hovedstaden (oo København ku jirto) waa midabka liinta.

Finland

Gobolladan ayaa noqonaya cagaar:

Helsinki iyo Uusimaa, Pirkanmaa iyo Päijät-Häme.

Gobolladan ayaa sii ahaan doona cagaar:

Central Finland, Central Ostrobothnia, Etelä-Savo, Itä-Savo, Kanta-Häme, Kymenlaakso, Lappi, Länsi-Pohja, North Karelia, North Ostrobothnia, Pohjois-Savo, Satakunta, South Karelia, South Ostrobothnia, Vaasa, Varsinais-Suomi iyo Åland.

Kainuu waa midabka liinta.

Gasiiraddo gaar ah oo ku yaalla Yurub

Laga bilaabo 5-ta Julaay waxa si gooni ah loo qiimaynayaa gasiiraddo gaar ah si loo sahlo safarka lagu aadayo gaasiiradaha ay dadka Norway aad u tagaan.

Muddadii cudurka safmarka ah socday waxa dhowr ka mid ah gasiiradahaas ka jiray xaalad faafid cudur oo ka duwan ta ka jirtay berriga.

Gasiiradahan ayaa cagaar noqonaya:

- De joniske øyer, Giriiga

- Kreta, Giriiga
 - Nordlige egeiske øyer, Giriiga
 - Korsika, Faransiiska
 - Madeira, Bortuqaal
 - Sardinia, Talyaaniga
 - Sicilia, Talyaaniga
- Gasiiradahan ayaa noqonaya casaan ama liin:*
- Azorene, Bortuqaal (liin)
 - Balearene, Isbaaniya (liin)
 - Sørilige egeiske øyer, Grigiiga (liin)
 - Kanariøyene, Isbaaniya (casaan)

Waddamo saddexaad oo gaar ah: Waddamo basali ah

FHI waxa uu markii ugu horreeyay qiimeeyay waddamada iyo aagagga ku jira liiska waddamada saddexaad ee EU ee ay u arkaan in ay ka jirto xaalad cudur oo saamaxaysa in la khafiifiyo xeerarka soo gelidda waddanka ee khuseeya dadka imanaya Norway, sida in laga dhaafo hoteel karantiil. Waddamadaas wixii hadda ka dambeeya waxa loogu yeedhayaa «waddamada basaliga ah».

Waddamadan iyo aagaggan ayaa noqonaya basali:

- Awstaraaliya
- New Zealand
- Israa'iil
- Jabaan
- Lubnaan
- Woqooyiga Makedooniya
- Seerbiya
- Koonfurta Kuuriya

- Maraykanka
- Singaboor
- Taywaan

Dhammaan dadka soo joogay waddan basali ah waxa si la mid ah dadka ka imanaya waddamada casaanka ah ku waajib ah tijaabo-qaadis, diiwaangelinta soo gelidda waddanka iyo karantiilka soo gelidda waddanka. Xeerarkani way isbeddeli karaan, taas darteedna waxa waddamada basaliga ah la hoos geyn doonaa qayb u gaar ah oo ka mid ah xeer-hoosaadka covid-19.

Dadka markii horeba loo oggolaay in ay Norway soo galaan, sida dadka deggan Norway, ee 10-kii maalmo ee u dambeeyay soo joogay «waddamada basaliga ah» waxa laga dhaafayaa hoteelka karantiilka marka ay yimaadaan Norway.

Awoowe/ayeeyo, saaxiib/saaxiibad iyo dadka kale ee ka yimaada waddan basali ah way soo geli karaan Norway

Xeerka guud waxa uu yahay in dadka ka yimi waddamada saddexaad aanay soo geli karin Norway, laakiin waxa jira dad laga dhaafay xeerkaas. Laga bilaabo 5-ta Julaay waxa xeerka laga dhaafayaa dad kale: Ajnebiga deggan waddan basali ah, oo qof deggan Norway la leh xidhiidh ka mid ah kuwan soo socda, waxa loo oggol yahay in ay soo galaan waddanka:

1. Dadka waaweyn, carruurta waalidka loo yahay iyo waalidka carruurta waaweyn
2. Awoowe/ayeeyo iyo carruurta loo yahay awoowe/ayeeyo
3. Saxiibka/saxiibadda ka weyn 18 sanno iyo ciyaalka saxiibka/saaxiibadda ee ka yar 18 sanno. Waxa shardi ah in saaxiibtinimadu jirtay ugu yaraan sagaal bilood islamarkaana waa in labada dhinac hore u kulmeen. Si saxiibka/saaxiibaddu u soo geli karaan waddanka waxa shardi ah in ay marka hore helaan oggolaansho.

Arrintaas waxa laga [codsanayaa Agaasinka Arrimaha Ajnebiga \(UDI\)](#). Waxa maantaba soo gelidda waddanka loo oggol yahay ehelka dhow, sida

xaaska/seyga/qofka nolosha lala wadaago iyo carruurta 18 sanno ka yar.

Sii akhriso: [Debcinno lagu sameeyay xeerarka soo gelidda waddanka ee khuseeya booqashooyinka qoyska iyo saaxiibbada](#)

Wax-ka-beddello cusub toddobaad kasta

FHI waxa ay toddobaad kasta qiimaynaysaa waddamada iyo aagagga kala duwan. Toddobaadyada tirada dhaban waxa la qiimaynayaa dhammaan waddamada iyo aagagga si loo go'aamiyo midabka ay yeelanayaan. Toddobadyada tiradoodu kisi tahay waxa la qiimaynayaa keliya in xaaladda faafidda cudurku keenayso in waddamada qaar laga beddelo cagaar oo laga dhigo casaan.

Warbixinnada cusub ee qiimaynta waddamada waxa la soo geliyanayaa regjeringen.no Jimce kasta saacadda 12, waxaanay dhaqangalayaan saqda dhexe, habeenka Isniinta ku xigta. Marka wax-ka-beddelladu dhaqangalaan, waxa la cusboonaysiinayaa xeer-hoosaadka covid-19 iyo [khariidadda ku jirta FHI.no](#).

Hubid la'aanta xaaladda faafidda cudurka ayaa keenaysa in talooyinka iyo xeerarka waddamada kala duwan isu beddelaan si degdeg ah

Waxa Norway iyo waddamada kale weli ka jira xeerar soo gelitaan oo adag, markaa iska hubi xeerarka ka jira waddanka aad u socdaalayso, iyo xeerarka karantiilka ee ku khuseeya marka aad ku soo laabanayso Norway.

Xeerarka soo gelidda waddamada kala duwan waxay isu beddeli karaan si degdeg ah haddii xaaladda faafidda cudurku sii xumaato. Taas darteed waxa dawladdu weli ku talinaysaa in fasaxa lagu qaato Norway. Waa sida ugu ammaanka wacan islamarkaana lagu xisaabtami karo. Dadka dibedda u dhoofa waxa qasab ku noqon karta in ay safaf dhaadheer galaan marka ay ku soo laabtaan Norway. Waxa lagama maarmaan ah in aynu

iska ilaalino cudurka inooga imanaya dibedda iyo noocyada cusub ee fayruska

Taas oo macnaheedu yahay in tijaabo-qaadista iyo hubinta xuduudda loo samayn doono si aad uga duwan sidii hore ee loo bartay. Inkastoo mar kasta laga shaqaynayo sidii hubinta xuduudda looga dhigi lahaa mid hawl yar, haddana waxa iman karta in safafku noqdaan kuwo dhaadheer.

Waa kuwan shuruudaha soo gelidda iyo karantiilka laga bilaabo 5-ta Julaay

- Waddamada cagaarka ah: Shardi maaha in aad tijaabo iska soo qaaddo ka hor soo gelidda Norway ama in aad karantiil gasho. Waa in qofku buuxiyo foomka diiwaangelinta soo gelidda waddanka oo tijaabo iska qaado marka uu yimaado xuduudda. Dadka deggan waddamo cagaar ah waa laga dhaafay ka madnuucista soo gelidda Norway.
- Waddamada midabka liinta: Socdaalka ka yimaada waddamada midabka liinta waxa khuseeya xeerarka dadka ka imanaya waddamada casaanka ah. Laakiin waxa marka dambe iman kara shuruudo u gaar ah waddamada midabka liinta.
- Waddamada casaanka ah: Dad kooban ayaa soo geli kara Norway. Dadka xaq u leh in ay Norway soo galaan, waa in ay wataan shahaado caddaynaysa in cudurka laga waayey ka hor inta aanay soo gelin waddanka, waa in ay buuxiyaan foomka diiwaangelinta soo gelidda, waa in ay tijaabo iskaga qaadaan xuduudda marka ay waddanka soo gelayaan, islamarkaana waa in ay galaan karantiilka safarka.
- Waddamada casaanka tiqda ah: Xeerarka soo geliddu waxay la mid yihiin kuwa waddamada casaanka ah, laakiin waxa sii dheer in karantiilka safarka qaar lagu qaadanayo hoteel karantiil.
- Waddamada basaliga ah: Awoowe/ayeeyo, saaxiib/saaxiibad iyo dad kaleba oo ka yimaada waddamadaas waxa laga dhaafayaa ka madnuucista soo gelidda waddanka. Sida kale xeerarka soo geliddu (karantiilka, tijaabo-qaadista iwm) waxay la mid yihiin kuwa waddamada casaanka ah.
- Adduunka intiisa kale: Xeerarka soo geliddu (karantiilka, tijaabo-qaadista iwm) waxay la mid yihiin kuwa waddamada casaanka tiqda ah.

Ma qaadatay tallaal buuxa ama covid-19 ma kugu dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay, islamarkaana ma caddayn kartaa adiga oo isticmaalaya shahaado noorwiiji ah ama yurubiyaan ah? Markaa waad soo geli kartaa Norway, waa lagaa

dhaafay karantiilka soo gelidda, mana u baahnid in aad wadato shahaado caddaynaysa in cudurka laga waayey, ma u baahnid in aad buuxiso foomka diiwaangelinta soo gelidda waddanka ama in aad tijaabo iska qaaddid marka aad timaado xuduudda. Arrintani ma ku xidhna waddanka aad ka imanayso.

Faahfaahin ka akhriso bogga [«Maxaa ku khuseeya?»](#) ee ku jira helsenorge.no. Waxa kale oo halkaas ku jira waxyaalaha ku jira liiska kore ee dadka laga dhaafayo, tusaale ahaan in da'yarta laga dhaafayo hoteelka karantiilka.

Halbeegga lagu qiimeeyo waddamada

Tirooyinka xadka ugu hooseeya ah ee soo gelidda waddanka ee ku saabsan tirooyinka dadka cudurka laga helay, tijaabooyinka la qaaday iyo dadka deggan waddamada Yurub waxa laga helayaa hay'adda ka-hortagga faafidda cudurrada ee Yurub ([ECDC](#)), oo islamarkaana ah meesha FHI ka soo qaato xogta uu ku saleeyo xisaabaha qiyaasta ah.

Astaamaha waxa halbeeg u ah tirada ku jirta halkii 100 000 ee dad ah 14-kii maalmo ee u dambeeyay, iyo qaybta tijaabooyinka la qaaday ee cudurka laga helay. «Ka yar 50 qof» waxa macnaheedu yahay «Ka yar 50 qof ayaa la xaqiijiyay in cudurka laga helay halkii 100 000 ee dad ah 14-kii maalmo ee u dambeeyay».

- Waddamada cagaarka ah: Ka yar 50 qof islamarkaana ka yar boqolkiiba 4 ayaa tijaabooyinka cudurka laga helay, ama ka yar 75 qof islamarkaana ka yar boqolkiiba 1 ayaa tijaabooyinka cudurka laga helay.
- Waddamada midabka liinta ah: Ka yar 50 qof islamarkaana boqolkiiba 4 ama ka badan ayaa tijaabooyinka cudurka laga helay, ama in u dhaxaysa 50 ilaa 75 qof islamarkaana in ka badan boqolkiiba 1 ayaa tijaabooyinka cudurka laga helay, ama in u dhaxaysa 75 ilaa 200 qof islamarkaana ka yar boqolkiiba 4 ayaa tijaabooyinka cudurka laga helay.
- Waddamada casaanka ah: In u dhaxaysa 75 ilaa 200 qof islamarkaana in ka badan boqolkiiba 4 ayaa tijaabooyinka cudurka laga helay, ama in u dhaxaysa 200 ilaa 500 qof ayaa la xaqiijiyay in cudurka laga helay.
- Waddamada casaanka tiqda ah: Haddii dadka la xaqiijiyay in cudurka laga helay yihiin 500 ama ka badan, ama marka aan la heli karin xog lagu kalsoon yahay oo lagu saleeyo qiimaynta.

Haddii ay waddan ku timaado xaalad gaar ah oo ku saaban faafidda cudurka, sida in ay ku bateen noocyada fayruska ee sida fudud u faafa, waxa waddankaas

laga dhigayaa casaan tiq ah iyadoo aan ku xidhnayn qaybta tijaabooyinka la qaaday ee cudurka laga helay.

Sida kalena qiimayn guud oo la sameeyo ayaa keeni karta in waddan marka la eego astaamaha guud noqon lahaa cagaar uu noqon waayo, oo laga dhigo midabka liinta ama casaanka.

**Tirooyinka xadka ugu hooseeya ah
laga bilaabo 5-ta Julaay**

	Ka yar 1% cudurka laga helay	1-4% cudurka laga helay	Ka badan 4% cudurka laga helay
Ka yar 50	Green	Green	Yellow
50-75	Green	Yellow	Yellow
75-200	Yellow	Yellow	Red
200-500	Red	Red	Red
Ka badan 500	Dark Red	Dark Red	Dark Red